UNITED NATIONS NATIONS UNIES

# XAFIISKA QARAMMADDA MIDDOBA Y U QAABILSAN KAALMEYNT SOOMAALIA (UNSOM)

Hadalkii uu jeediyay Ergeyga Gaarka ah (SRSG)

Mogadishu, 24 July 2013

Iyadoo in ka yar laba bilood keliya ay ka harsantahy qabashada Shirka Brussels, kulankan waa fursad lagu qiimeenkayo horumarka laga gaaray hanaaka Heshiiska Cusub (New Deal) iyo guud ahaan arrimahab. Kulanku wuxuu kaloo nasiinayaa fursad aan si qotodheer dib ugu eegno meelaha muhiimka leh ee weli u baahan shaqo iyo in si gaar ah loogu soo jeesto. Xiligan waxaa dadaal loogu jira sidii loo xaqiijin lahaa in shirka soo socda uu noqdo mid lagu guuleysto, dhidibadana u aasa Soomaaliya oo nabad ah oo barwaaqo ah.

Barnaamijka kulankan waxaa ku qoran inaan anigu hordhac sameeyo. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa sawir kooban oo ah sida aan u arko inay arrimuhu hadda yihiin marka la eego dadaalkeena caalamiga ah ee lagu taageerayo horumarka ka socda dhanka siyaasadda iyo amniga. Haddaan soo kobo, sawirku waa mid isku dhaf ah, oo waa mid dhiirrigelin iyo welwelba leh. Waqtigan ma aha waqtigii faahfaahin la geli lahaa, haddaad wararka akhrisaan, sawirka waad helaysaan: Al-Shabaab waxay kordhiyeen ololahooda dagaalka, waxayna weli yihiin khatar xoog leh, AMISOM iyo ciidamada amniga qaranka Soomaaliyeed waxay gaareen guulo waaweyn laakiin waxay la'yihiin awoodo muhim ah ee ay guusha ku dhammeystiraan, waxaa weli dhimman oo aan xal siyaasadeed loo helin qalalaasaha ka taagan Kismaayo, inkastoo IGAD uu ku bixiyay dadaal wanaagsan, waxaa sidoo kale qorshihiisa dib uga dhacay dibu-eegidda dastuurka iyo hanaan ku meelgaar ah oo loo sameeyo maamullada gobollada, dadweynaha caadigana weli ma arkin faa'iido joogto ah oo ballaaran oo ay ka helaan guulaha siyaasadda iyo amniga ee la gaaray.

Arrinta ugu dambeysa ee aan soo sheegay waa mid muhim ah: waxaa guulo wax ku ool ah laga gaaray dhinacyada siyaasadda iyo amniga. Waa inaan iska indhatirin isbedelka weyn ee ay gaareen dadka Soomaaliyeed iyo saaxiibadooda ee bulshada caalamka, gaar ahaan AMISOM, labadii sanno ee la soo dhaafay. Farqiga laga dareemay magaalada Muqdisho waa sida midka u dhexeeya habeen iyo maalin. Xaaladda hadda jirta waa fursad dhab ah ee guulo waaweyn oo dheeraad ah lagu gaaro: waxaa jirta dowlad federaal ah oo sharci ah iyo xukuumad ay hogaaminayaan Madaxweynaha iyo Ra'iisal Wasaaraha iyo Baarlamaan Federaal ah oo si dhab ah u shaqeynaya isagoo uu hagayo Gudoomiyaha Baarlamaanka. Waxaa kaloon haysanaa bulshada caalamka oo midaysan oo doonaysa kartina u leh inay Soomaaliya gacan siiso.

Mudaneyaal, UNSOM weli waxay ku jirtaa bishii labaad. Waxaan jecelahay inaan saaxiibada Soomaaliyeed iyo kuwa caalamkaba sida weyn ee naloo soo dhoweeyay – iyo sida aad noo garab istaagteen ka dib weerarkii lagu soo qaaday Xarunta Qaramada Midoobay 19kii bishii June. Waxaan mar kale ku celinayaa in Qaramada Midoobay ay ka go'antahay inay gudato xilkeeda ku aadan Soomaaliya, waxayna sii wadi doontaa inay garab istaagto dadka Soomaaliyeed. Waxaan ogahay inaan aad u doonayno inaan gudano xilkeena, gaar ahaan inaan bixino dhexdhexaadin siyaasadeed oo lagu taageerayo nabadeynta iyo dibuheshiisiinta, Dowladda Federaalka Soomaaliyeedna lagu taageerayo isku xirka/isuduwidda kaalmada caalamiga, gaar ahaan dhanka amniga iyo dhismaha dowlad federaal ah. UNSOM waxay ku hawlantahay dhinacyadan dhammaantooda iyo in ka badanba. Markaan sii weynaano toddobaadyada soo socota, waxaynu yeelan doonaa karti iyo awood intaa ka badan si aan nabad iyo barwaaqo ugu soo dabaalno Soomaaliya, annagoo iskaashi dhab ah la leh AMISOM.

Labada bilood ee soo socota waxay noqon doonaan kuwo xasaasi ah si aan u xaqiijino inaan gaarno waxaan dhammaanteena doonayno. Horumarka siyaasadda ayaa noqon doona udubdhexaadka arrinta. Halkudhigaygu waa wadahadal dheeraad ah, ka wada qaybgal dheeraad ah, iyo wax qabad wacan. Siyaasiyiintu waxay aalaaba yiraahdaan siyaasaddu waa fanka ah in la qabto wixii dhici kara. Toddobaadyada iyo bilaha soo socda dhammaanteena waxaynu u baahan doonaa inaan fannaaniin waaweyn noqono.

Mudaneyaal, haddaan u soo laabto Heshiiska Cusub (New Deal), waxaan rabaa inaan si dhakhso ah u taabto laba arrin oo khuseeya kulanka maanta lana xiriira wixii qabsoomay iyo wixii dhiman ee u baahan in la qabto. Waxaan soo dhoweynayaa iskaashiga ka dhexeeya deeqbixiyeyaasha, Midowga Yurub, Bangiga Adduunka iyo bahda Qaramada Midoobay, iyadoo ay hoggaaminayso Dowladda Federaalka Soomaaliya.

# XAFIISKA QARAMMADDA MIDDOBA Y U QAABILSAN KAALMEYNT SOOMAALIA (UNSOM)

Horumar wanaagsan baa laga gaaray ugu yaraan saddex meelood:

I. Waxaa socota qiimeyn lagu sameynayo tag-darrida jirta
II. Waxaa socota oo meel fiican maraysa diyaarinta qorshaha kooban (compact)
III. Waxaa la dejiyay istaraatijiyad isgaarsiineed si loo xaqiijiyo in farriimaha Heshiiska Cusub (New Deal) si baahsan loo faafiyo ayna fahmaan dhammaan Soomaalida iyo dadka kale ee ay arrintu khuseyso dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

Hase ahaatee, waxaa weli jira dhowr su'aalood oo muhim ah oo u baahan in laga jawaabo intaan la gaarin shirka Brussels.

Marka hore, diyaarinta iyo hirgelinta Heshiiska Cusub (New Deal) waa inay noqdaan arrin dhab ahaantii loo wada dhanyahay. Heshiiska Cusub wuxuu u baahanyahay inuu ahaado hanaan ay Soomaalidu leedahay ayna hogaanka u hayso Dowladda Soomaaliya. Taasi waxay u baahantahay istiraatijiyado cusub ee haweenka laga qaybgeliyo go'aan qaadashada, lala tashado gobollada kale ee dalka ee siyaasad ahaan adagtahay in laga qaybgeliyo, iyo in la raadiyo siyaabo halabuur leh ee lagu la tashado dadka ku nool goobaha ka baxsan dhulka ay dowladdu gacanta ku hayso. Waxaa weli haray su'aalo la xiriira sidii gobollada, sida Somaliland iyo Puntland ay uga qaybgeli lahaayeen Heshiiska Cusub (New Deal) iyo Qorshaha Kooban (Compact) ee lagu soo bandhigi doono shirka Brussels. Qaramada Midoobay waxay diyaar u tahay inay dowladda gacan ka siiso sidii wadahadalladan hore loogu qaadi lahaa.

Marka labaad, waxay iila muuqataa in doodda federaalka ee dalka ka socota awgeed, qorshaha kooban ee lagu soo bandhigi doono Brussels uu noqon doono mid ku meelgaar ah oo isbedel ku iman karo. Waa in lala xiriiriyaa hanaanka wadatashiga ee hadda socda iyo midka mustaqbalkaba, sida dibueegidda dastuurka iyo u diyaargarowga doorashooyinka sannadka 2016, waana inaan diyaar u ahaano inaan qorshaha kooban isbedel ku sameyno markay lagama maarmaan noqoto hadba sida ay tahay natiijada hawlaha la hayo. Sidii horeyba loogu nuuxnuuxsaday, shirka Brussels ee dhacaya 16ka September ma aha meeshii ugu dambeysay ee loo socday, ee waa tallaabadii muhimsanayd ee ugu horeysay ee hanaanka Heshiiska Cusub (New Deal). Dhammaamteena waxaynu u baahnaan doonaa inaan billowno inaan ka fikirno hanaanka/hawsha ka dambeysa shirka Brussels.

Marka saddexaad, arrinta la xiriirta ballanqaadyada, shirka Brussels waxaa loola danleeyahay in lagu billaabo in bulshada caalamku ballanqaad cad la timaado. Waxaa muhim noqon doonta in Dowladda Soomaaliya ay la xiriirto saaxiibadeeda ka hor intaan la gaarin shirka Brussels si loo xaqiijiyo in taageero ballaaran loo helo qorsha kooban, taasoo ay ka midtahay taageero laga helo meelo ka baxsan deeqbixiyeyaasha OECD DAC. Waxaa muhim noqon doona wadahadallo furan oo dhexmara Dowladda Soomaaliya iyo saaxiibada ay caalamiga si loo maareeyo filashooyinka ka imanaya labada dhinac shirka soo socda ka hor. Guusha laga gaari doono shirka waa in lagu miisaamaa haddii aan isku afgaran karo qorshe iyo hab shaqo ee keeni kara waxay ay Soomaalidu u baahantahay ee waa inaan lagu miisaamin tirada lacagta la ballanqaado.

Gunaanadkii, inkastoo harumar fiican la gaaray, waxaa weli haray su'aalo muhim ah oo la xiriira ka wadaqaybgalka hanaanka Heshiiska Cusub (New Deal), gaar ahaan markay timaado ka qaybgelinta gobollada, habka uu u dhacayo shirka Brussels iyo ballanqaadyada laga filayo bulshada caalamka iyo weliba hanaanka ka dambeeya shirka Brussels iyo Heshiiska Cusub (New Deal). Qaar ka mid ah su'aalahan waxaa laga ga hadli doonaa kulanka maanta. Arrimaha kale waxay u baahnaan doonaan in laga yeesho doodo iyo wadahadallo dheeraad ah bilaha soo socda.

Waxaan doonayaa inaan mar kale xaqiijiyo in Qaramada Midoobay ay si buuxda uga go'antahay inay Dowladda Soomaaliya ku taageerto hirgelinta Heshiiska Cusub (New Deal) ee Soomaaliya. Waxaan ku hanweynahay in doodeena maanta ay noqoto mid wax ku ool ah.